

# Qorshaha Degdega ah ee Qoyska: Tabobarka & Tijaabada



Ugu yaraan sanadkii halmar qoysku ha kulmo si aad uga wada hadlaan oo aad dib cusboonaysiisaan **Qorshaha Degdega ah ee Qoyska**. Kani sidoo kale waa wakhti fiican oo aad ku hubin kartaan alaabta ku jirta **Sanduuqiina Xaaladda Deg-degga ah**. Go'aami haddii loo baahan yahay tabobar, qalab, iyo agab dheeraad ah. Ku tabobaro, ku tabobaro, ku tabobaro qorshahaaga. Samaynta ku tabobarashadu waxay horumarin kartaa wakhigaaga falcelinta waxayna gacan ka gaysan kartaa inaad argagixin marka ay timaaddo xaalad deg-deg ah.

## A. Baro sida iyo halka laga damiyo biyaha iyo laydhka:

✓ Meesha uu ku Yaalo Keeska Biyaha ee Wayni:
✓ Meesha uu ku Yaalo Keeska Naqasku*:
✓ Meesha ay Taalo Kalbadda la Badbaddali Karo:
✓ Meesha uu ku Yaalo Sanduuqa Korontadu/Meesha ugu Wayn ee laga Gooyo:
✓ Meesha uu ku Yaalo Gacanka Albaabka Geerashka laga Furo:
✓ Meesha ay ku Yaalaan Agabyada Kale:

\* Ha **XIRIN** naqaska ilaa aad uriso urta gaasta dabiiciga ah, ilaa aad maqasho codka gaasta baxaysa, ama aad aragto calaamado kale oo sheegaya walax hoosta ka daanaysa.

**B. Sawir qorshe muujinaya dhismaha gurigaaga kaasoo sheegaya meelaha laga baxayo iyo daaqaadaha, meelaha laga xiro agabyada, iyo Sanduuqa Xaaladda Deg-degga ah.** Hubi in cid kasta oo qoyskaaga ah ay si fiican u taqaano. Tusi dadka carruurta sii haya iyo martida.

**C. Diyaari laba meelood oo ay qoyskaagu ku kulmi karaan.** Midi wuxuu noqonayaa **Goobta Kulanka Xaafadda aad deggan tahay**, ee ku dhaw gurigaaga sida cirifka jidka ama beerta lagu nasto ee ugu dhaw. Ka labaad wuxuu noqonayaa **Goobta Daadgureynta**, meel caan ah oo guriga ka fog oo qoyskaagu isku urursan karaan haddii ay dhici waydo inaad guriga ku soo laabataan.

**D. Dooro Cid lala Xiriir oo Magaalada ka Baxsan** oo cid kasta oo guriga joogtaa taqaan si aad u wacdaan uguna sheegtaan goobta aad joogtaan iyo xaaladdiina. Cid kasta waxaa fiican inay maskaxda ka xasuusan karto lambarkan taleefanka ama ay qaadato kaar uu ku qoran yahay. Inta lagu jiro xaaladaha deg-degga ah, khadadka taleefanada ee gudaha waxa dhici karta in loo xiro dadka ka shaqaynaya xaaladda deg-degga ah.

**E. Isku day inaad xaadirto tabobarka Gargaarka Degdega ah/CPR.** Ilaali shahaadooyinka.

**F. Hubi in cid kasta oo guriga joogtaa ay taqaan sida qaab badbaado ah loogu shaqeeyo dab damiyaha.** Fiidyaw taas tilmaamaya ayaad ka heli kartaa onlayn adigoo isticmaalaya meelaha wax laga baaro ee aad rabto.

## G. Lambarrada Taleefanka ee Muhiimka ah:

✓ Waaxda Dabka ee Aan Deg-degga Ahayn:
✓ Waaxda Bilayska ama Taliyaha ee Aan Deg-degga Ahayn:
✓ Dhakhtarka Daryeelka Aasaasiga ah:
✓ Shirkadda Naqaska/Borobeeynta:
✓ Shirkadda Korontada:
✓ Shirkadda Biyaha:
✓ Adeegyada Kale:
✓ Xakamaynta Sunta: <b>1-800-222-1222</b> – 24 saacadood maalintii, 7 maalmood toddobaadkii, 365 maalmood sanadkii

**U ISTICMAAL "911" XAALADHAHA DEG-DEGGA EE NAFTA HALIS KU AH OO KALIYA**